

WARQADDA WARGALINTA WAALIDKA LEH ARDAY AQOONTA INGIRIISIGU KU YAR TAHAY

Taariikh

Gacaliye Waalid/Masuul,

Ilmahaaga, _____, waxa loo doortay inu ka qaybgalo barnaamij loogu talagalay ardayda aqoonta Ingiriisigu ku yar tahay. Waxa la gartay in ilmuhu u baahan yahay gargaar markii la eegay qaar ka mid ah waxyaabahan soo socda:

- Sahan Lagu Sameeyay Afka Guriga
- Wareysi lala yeeshay ardayga/waalidka
- Diiwaanka/qoraallada dugsiga
- Imtixaanka Aqoonta Ingiriisiga
- Talooyin u bixiyay macallinku

Heerka Ingiriisiga ee ilmahaagu waa mid ah: Bilaw Dhex Sare

Heerka Fasal ee ilmahaagu waa: _____

Ulajeedada laga leeyahay barnaamijka ilmahaaga loo qorsheeyay waxa weeye in laga gargaaro barashada Ingiriisiga, inu dugsiga ku guulaysto, isla markaana ka soo baxo shuruudaha qalinjabinta ama dugsi-dhamaysiga.

Habka waxbarasho ee lagu isticmaalayo barnaamijka aqoon kordhinta Ingiriisiga ee loogu talagalay ilmahaagu waa:

_____ Barnaamij casharada ku salaysan: Waxbarashada waxa lagu bixiyaa Ingiriisi kaliya waxana lala beegsadaa heerka ardayga. Maalin kasta wakhtigiisa intiisa badan waxa u ardaygu qaataa fasallada isagoo la jooga arday kale oo aqoontooda Ingiriisigu yar tahay.

_____ Barnaamijka ka-saarista: Todobaadkii dhawr jeer ayaa ardayga laga dhaafaa waxbarashada fasalkiisa loogu talagalay si ardaygu u tago waxbarasho Ingiriisi oo gaar ah.

_____ Barnaamijka ku-jirista: Ardayga waxa la siiyaa waxbarasho gaar ah isagoo ku jira fasalka heerkiisa ah.

Waxa ilmahaaga loo ogalaan doonaa inu ka baxo barnaamijkan ka dib marka la eego mid ka mid ah waxyaabahan soo socda:

- Imtixaanka Aqoonta Ingiriisiga
- Talo macallin
- natiijada kaadhka warbixinta
- Codsii waalid
- Natiijada Imtixaannada Midaysan
- Faylka ardayga
- Talada Guddida 'LEP'

Fadlan magacaaga ku saxeex meesha hoose ee ogeysiiskan si ad u muujisid inad heshay isla markaana fahamtay. U soo celi ogeysiiska _____.

Fadlan ka soo wac qofka hoos ku qoran tilfoonka _____ haddii ad doonaysid in ilmahaagu ka qaybgalo barnaamijka aqoon kordhinta Ingiriisiga ee loogu talagalay ardayda aqoontooda Ingiriisiga yar tahay.

Si xishmad leh,

(Saxeexa Waalidka/Masuulka)

Taariikh _____